Jamhuuridda Federalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraarka Kalfadhiga aan caadiga aheyn 1-aad.

Documentiga Kal.1-aad Kul.7-aad **26/12/2013**

Kalfadhiga aan caadiga ahayn ee 1-aad.

Kulankiisa:7-aad, saca fur.11:38gh, sac xir. 3:10gd.

Ajendaha:

1.Furitaanka Aayadaha Qur'anka kariimka

2.Naadiga Dhalinyarada Ee Baarlamaanka

3.Kulanka wada tashiga ee Mustaqbalka Dhalinyarada.

Shir- Guddoomiye Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan jawaari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'anka kariimka uu Akhriyay, Cusmaan Maxamed Cusmaan.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka: wuxuu soo jeediyay, in uu ku faraxsan yahay kulanka dhalinyarada, maahan markii ugu horeysey oo aan la kul-mo dhalinyarada waa markii labaad, dhlinyarada waxey u baahanyihiin in loo dhiibo maamulka iyo maareeynta dalka, waa in leysku xiraa xidhibaa-nka iyo dhalinyarada, waa in ay hirgasho Shir-weyne Qaran lana sameeyo

Baarlamaankana gacan ayuu idinku siinayaa, hadey ka maqan yihiin dhali-nyarada ma suurta galeyso, waa in ay ka soo baxaan Baarlamaanka dad

Dhalinyaro ah, waxaan Rai'sal Wasaaraha ka codsadey Barnaamijka Dhali-anyarada in uu sameeyo wuuna iga ogolaadey, waa inaan aamino in aan sameyn karno sharci aan ku dhaqmikarno in aan nahay soomaali mush-kulada ugu weyn ee naheysato waa qabiil aan ka

baxno qabiilka, waa la soo gali karaa waana laga bixi karaa qabiilka, wax faa'iido uu leeyahay ma jirto, Intaa ka dib Guddoomiyaha waxa uu ku soo dhaweeyay.

Guddoomiyaha Naadiga Dhalinyarada , Xil: Nuux: waxa uu sheegey, in uu kulankaan xiiso gaar ah manta inoo leeyahay, waxaadna mudan tihiin in si gaar ah la idinku mahad celiyo, hogaanka umada marka uu wanaagsanaado, waxaa wanaagsanaanayo inta kale oo dhan, hada waxaan u mahad celin lahaa Guddoomiyaha laa kiin hada isaa jooga, naadiga markii la aasaasayey kama badno sanad, siyaasada wadanka aan isugu nimid, waxaa laga rabaa in si cad looga doodo aragtideena iyo waxaan niraahno in si cad looga warbixiyo, qof walba ha la xiriiro xildhibaanka hana wareysto, xildhibaankii diida hala soo sheego si loo mariyo guddiga anshaxa.

Xil: Xaaji Cabdi: wuxuu soo jeediyay, runtii waxa aan ogahay iyo waxaan soo marey ma soo koobi kari, balse in yar ayaan ka sheegayaa, waxaa aad ii taabatey Qudbadii Guddoomiyaha Baarlamaanka, soo jeediyay,sanadkii **1943dii** ayay **13 dhalinyaro** usu taageen in ay dalka ka saaraan gumeys-iga, ka ugu weyn waxa uu jirey **38sano,** kan ugu yar waxa uu jirey **20sano,**waxaad nasiib uyeelateen in ay idiinla joogaan, dadkii ka soo qeyb galey shirarkii **S.Y.L,** waxaan aad u xasuusanahay halku dhigyadii ay dhihi jiree, **waxaan ahay soomaali, waxaan ahay S.Y.L** ayay jidadka ku marijireen, qabiil lama weydiin jirin, waxaan rajeynayy in aad ka bilowda-an meesha ay ka bilaabeen, waxaan idiinka codsanayaa in hal ku dhigii Guddoomiyaha idin yiri aan dhahno, **waxaan ahay soomaali, waxaan ahay soomaali.**

C/raxmaan cumar: Jaamacada xamar,wuxuu sheegey, dowlada shirar badan ayay qabataa ku was oo aan laheyn daba gal, yaan la noqon xamaasad, Guddoomiye, dadka laba ayay kala yihiin, Qaxar ujoog, iyo Qurbo joog, dadka hala wada simo.

Guddoomiyaha, codkeyga waxaan ku biirinayaa habdhowraha Baarlam

Xil:C/laahi , habdhowre , waa in aad luuqadiina adeegsataan Af-Soomaali

C/qaadir Axmed Colaad: Jaamacada Badweynta hindiya,wuxuu soo jeediyay, dhalinyaradii bada wey ku dhibtoo deen ilaa **1991** ayay qaxaayeen, kuwa dibada ku nool dhib ayay ku noolyihiin, waxaan oran lahaa in lala xisaabtamo xukuumada, waxa kaloo jira Ugaas aan waxba ka jirin, **2016ka** waxaan rabnaa in qof walbo codkiisa uu xor ahaado taas-na adiga ayaa lagaarabaa, waxaad arkeysaa qof aan aqoon laheyn oo boos uu u qalmin jooga, kii aqoonta lahaa waxaa lagu qanciyay **4.5.**

Ayaan Cabdi: Horn of Africa,waxey soo jeedisey: in dhalinyarada ay manta wax shaqo ah ayna heynin, kuwo jaamacado soo dhameystey oo naftooda wax ay ku maareeyaan aysan jirin, Guddoomiye dhalinyaradaas hada maxaa loo haayaa.

Mustaf Maxamed Cali: Jaamacada muqdisho, wuxuu sheegey, markii ay dhlinyarada isu yimaadaan, waxaa la yiraahdaa dowlada waa wanaagsan tahay, mararka qaarkood, waxaa leys weydiiyaa shirarkaan aan tageyno yaa lala xisaabtamayaa oo fulinteeda iska leh.

Ilhaam maxamed: Jaamacada, Plazma.waxey soo jeedisey, waxaan ku faraxsanahay in manta dhalinyarada lala kulmayo, waa in qabyaalada laga tagaa, waa in aad wadan kiina hormarisaan, balan qaadyada wey fara badan yihiin, waa in lala wareegaa balamada.

Guuddoomiyaha Baarlamaanka: wuxuu soo jeediyay, talooyinkiina waan qaadaney waan gudbinaayaa, shaqada joogtada ah waxaa looga mid noqo-nkaraa tar-tan furan, waxaa yimid la xisaabtan, xildhibaanada dhaxdooda waa la xisaabtami kartiin waad u yeeri kartiin, Matalan dhalinyaradii hore

Ee **(S.Y.L)** marka ay fariinta usu gudbinaayan waxey raaci jireen, fardo,dameero, adinka hada wey idiin sahlantahay, dhalinyarada waxey ubaahanyihiin qaban-qaabo, waa in aad wax soo dhacsataa hasugin in laguu yeero, shacabka xidhibaanka ayay la xisaabtamayaan, xukuumadana xildhibaanka ayaa la xisaabtamaya, madaxda waa adeege oo shacabka ayay u deegaan sidaas u fahma, waa in aad soo qaban qaabisaan naadi xamaasad leh.

Ayaan Cad-Ceed: Jaamacada Saba: waxey sheegtey, in Guddoomiyaha uu yiri waa in aad ku hadashaan Af-soomaali, waxaan kaa codsanaayaa in Af-Soomaaliga laga hormariyo jaamacadaha dalka lana mideeyo, waxaa jirta in dhalinyaro badan oo jaamacadaha ka soo baxey hadana shaqo aan heyn, maxaa ugu tala gasheen dhalinyaradaas, maxeyse tahay doorka ay dowlada ku leedahay dhlinyarada.

Cumar Saney:Jaamacada Soomaaliya. Wuxuu soo jeediyay, Guddoomiye waxaa jirta ardey ku baratey manhaj sax ah, talo soo jeedin.

a)Nagu aamina shaqooyinka aad adinka heysaan?

b)Noo dhiiba shaqooyinka wasaaradaha?

c)Meeshan kaliya ha isku koobina ee soo booqda meesha ardeyda ay joogaan oo ha leys dhexgalo xildhibaanada iyo shacabka?

Ruquyo Warsame: Jaamacada Simad.waxey sheegtey, waxaa la yiri meeshan waxaa ku kulmaya ururka dhalinyarada iyo ardeyda jaamacad-aha, Guddoomiye waxaan kaa codsanayaa in ardeyda loo abuuro shaqo ama farsamo gacan, waxaa la aasaasey manhaj oo ah dugsiyada aada, Guddoomiye laha sameeyo manhaj kale oo ah Jaamacadaha aada.

Cabdi Xaashi: Jaamacada Jobkey. Wuxuu sheegey,Guddoomiyaha waxan ka codsanayaa xildhibaanada marka ugu horeysa ee la qabanayo kulan in ay dhahaan waxaan ahay soomaali.

Sahro Ismaaciil,butland. Waxey soo jeedisey, in ay wax ku baratey wadanka Suoth Sudan, ardey badan ayaa ku dhibaateysan aniga waa ii cuntami weysey in aan sii joogo wadan aadan laheyn, dadka sida ay usoo noqdaan ayay la'yihiin.

Xil:C/qaadir Baqdaadi:wuxuu soo jeediyay, waxaan u baahanahay daryeel iyo taakuleen bur-burka sida looga kabto waa adagtahay **95%** ardeyda maheystaan waxbarasho, ardeyga markii uu helo taa ku leyn, waa in uu yahay farsamo yaqaan iyo in loo sameeyo sharciyad loo maro jaamacadah

Xil: Maareeye: wuxuu sheegey,ugu horeyntii waxaan amaanayaa dadkii halkan ugu mahadceliyay Guddoomiyaha Baarlamaanka, eeyiri waa Guddo-omiyihii ugu horeeyay ee dhageysta codka shacabka, waa Guddoomiyihii aan isku niyad sanahay ee aan ku faraxsanahay, aniga wey ila wanaagsan tahay in ay hal ku dhig noo noqoto,**Soomaali Baanahay.**

Xil:Maryan Aweys: waxey sheegtey, waxaan umahad celinayaa dhalinyara-dii manta isku soo xil qaantey in ay madaxda su'alo weydiiyaan, Mudane: Guddoomiye hada waxaan ka imid **Hotel City Palace** oo xaflad lagu qaban-aayay **Ardey ka Qalin jibineysey Jaamacada Plazma,** aad ayay ii farxad galineysaa, waxaan leeyahay soomaaliya waxaa usoo baxey iftiin, taas ayaana farxad ah in aad noqotaan dhlinyaro aan ku fikirin qabiil, kana faa'ideysta fursadi hiina qaaliga ah.

Axmed Maxamed Dirshe: Qurbo joog, wuxuu soo jeediyay, soomaaliya waxaan ka tagey sanadkii **1984tii,** waxaan ku noolaay dalka Norwey,Gud-doomiyaha iyo aniga isku magaalo ayaan jogney, aniga ma oranaayo Guddoomiye, waxaa doortey xildhibaanada, aniga waxaan oranaayaa (jawaari), waxaan fariin kaaga wadaa wadankii aad ka soo tagtey dadkii ku noolaa wey ku salaamayeen, masjidkii aad dhistey wali waa sidiisii, caruurtii aad Af-Soomaaliga u bilowdey iskuulkii wey dhameeyen, waad ku mahadsantahay kulankan aad qabatey.

Xil:Dr: Cilmi, wuxuu sheegey, waxaan aad ugu faraxsanahay, dhalinyaro in taan tiro la eg oo aqoonyahano ah in ay joogaan, qofka aqoonta leh waxa uu janis u leeyahay in uu ogaado waxa aduunka ka jira oo waad la socon kartaan aqoonta waxbey hagtaa waxbey toosisaa maxkada qofka wax yaq-aan qofka kale aan wax baran waa ka hormarsan yahay, wixii aduunka ka dhaca waxad ka heleysan (laptopkina iyo mobile kina) waa hormar, waxaan idinku boorinayaa in aad dadaashaan.

Guddoomiye Jawaari: wuxuu sheegey, sida aad la socotaan mardhow Baarlamaanka waxaa la keeni rabaa barnaamijka xukuumada, adinkana sifiican u dhageysta, hadii ay ku jiraan Baarlamaanka waan ku dareynaa dhalinyaro hadii ayna ku jirina waan xoojineynaa, waxaa kaloo la sameynayaa Academiyo Af-soomaali ah meeshii ay dhisan lahaayeen waa la siiyay, waxaa loo magacaabey Prof: Afrax, **Jaamacadaha aan aadno,** wadankeena waa bur-burey, sidaas oo ay tahay waa la dadaaley ardey badan ayaa jaamacado ka soo baxey.

Shir Guddoomiye Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan jawaari, uu shir Guddoominayay , kalfadhiga aan caadiga aheyn ee 1-aad kulankiisa 7-aad, uu sheegey in uu shirka xiran yahay, saacada makey aheyd 3:10gd.